

Qaabka loo Xalliyo Tabashooyinka

Haddii aad tabasho qabto, hab dhakhso ah oo wax looga qabto waa inaad toos ula hadasho bixiyahaaga ama maamulaha barnaamijka.

Haddii aadan ku raacsanayn daawaynta ama daawadaada, waxaad codsan kartaa fikrad labaad oo ka timaad xirfadle caafimaad oo kale oo ku sugan barnaamijka daawayntaada ama inaad **Access & Crisis Line** wacdo **1-888-724-7240 (TTY: 711)**. Wax kharash ah kuuguma kacayso fikradda labaad.

Adeegyada Caafimaadka Habdhaqanka Degmada San Diego (Qorshaha) waxay qandaraas kula jirtaa laba wakaaladood si ay uga caawiyaan xubnaha inay wax ka qabtaan adeegyadooda caafimaadka habdhaqan. Si aad u hesho caawimo cabasho ama rafcaan, waxaad la xiriiri kartaa mid ka mid ah wakaaladaha hoose.

**Marka la eego Adeegyada Bukaankii
jiifka/Degganaansho, wac:**

**JFS PATIENT ADVOCACY
619-282-1134 or 1-800-479-2233**

Marka la eego Adeegyada Bukaankii-socodka, wac:

**CCHEA
(Consumer Center for Health Education & Advocacy)
1-877-734-3258**

Xuquuqdaada inta Hannaanku Socdo

In lagugu daaweeyo qaddarin iyo inaad ku hesho daawaynta luuqadda aad doorbidayso.

Inaad hesho fikrad labaad oo ku aaddan daawaynta ama daawadaada.

Inaad doorato qof adiga ku matala. Adigoo adeegsanayo oggolaansho qoraal ah, waxaad dooran kartaa bixiye ama wakiil idman oo adiga ku matala.

Inaad cid u soo kaxaysato kulamada iyo dhagaysiyada.

Inaad xor ka ahaato takoor ama ciqaab inaad gudbisay cabasho ama rafcaan darteed.

In asturnaantaada uu sharcigu ilaaliyey.



HANNAANKA XALKA DHIBAATADA

**Cabashooyinka, Rafcaanada,
& Dhegaysiyada Cadaaladda ah ee Gobolka**

**COUNTY OF SAN DIEGO BEHAVIORAL
HEALTH SERVICES**

Sida loo Gudbiyo

Waxaad ku gudbin kartaa hadal ama af adigoo taleefan adeegsanaya ama fool ka fool adigoo u gudbinaya Wakaaladda U-Doodista (codsiyada rafcaanka afka ah waxa waajib ah inuu raaco rafcaan qoraal ah). Sidoo kale waxa dhici karta inaad ku gudbis qoraal adigoo adeegsanaya foomka Cabashada iyo Rafcaanka ee laga heli karo xafiiska bixiyahaaga.

Bixiye ama wakiil idman ayey dhici kartaa inuu isagoo adiga ku matalayo ku gudbiyo hadal ama qoraal. Rafcaanada uu gudbiyo bixiye isagoo adiga ku matalayo waxay u baahan yihiin oggolaanshahaaga qoran.

Dhegaysiyada Cadaaladda ah ee Gobolka

Hadday kaaga dhammaatay Hannaanka Rafcaanka Qorshaha, waxaad codsan kartaa **Dhagaysiga Caddaaladda Gobolka** haddii aad diidan tahay go'aanka kama dambaysta ah ee rafcaanka ee ka adeegyadaada. Waxaad sidoo kale codsan kartaa dhagaysi ku saabsan jiritaan la'aanta ku dhammaystiri waayidda wakhtigii loo baahna go'aanka rafcaanka.

Dhagaysi Caddaaladda Gobolka waxa waajib ah in lagu codsato 120 maalmood gudahood ee helitaanka go'aanka rafcaankaaga. Waxaad codsan kartaa inaad sii waddo helitaanka adeegyada muddada aad sugayso go'aanka. Codsiga waxa waajib ah in lagu sameeyo 10 maalmood gudahood ee taariikhda go'aanka rafcaankaaga. Lagaa rabi maayo inaad bixiso kharashka adeegyada weli kuu socdo muddada dhagaysigaaga la sugayo ama haddii go'aanka ugu dambeeya uu waafaqo go'aanka degmada ee kugu lidka ah.

Si aad u hesho kaalmo ku aaddan Dhagaysiga Caddaaladda Gobolka, waxaad u wici kartaa **Department of Social Services** toos 1-800-743-8525 ama booqo <https://www.cdss.ca.gov/hearing-requests>

5 maalmood gudahood ee helitaanka, waxaad heli doontaa waraaq qoraal ah oo lagu xaqiijinayo helitaanka cabashada ama rafcaankaaga. 30 maalmood gudahood, waxaad heli doontaa go'aan qoraal ah.

Waxaad codsan kartaa inaad sii wadato adeegyada muddada sugitaanka go'aanka rafcaankaaga. Codsiga waxa waajib ah in lagu sameeyo 10 maalmood gudahood laga bilaabo taariikhda NOABD-kaaga la diray ama si gaar ah laguugu dhiibay.

Lagaa rabi maayo inaad bixiso kharashka adeegyada weli kuu socdo muddada rafcaankaaga la sugayo ama haddii go'aanka rafcaanku uu waafaqo go'aanka degmada ee kugu lidka ah.

Rafcaan la dadajiyey ayaa la gudbin karaa marka hannaanka caadiga ah uu si daran khatar u gelinayo nolosha, caafimaadka, ama awoodda helitaanka, joogtaynta ama dib-u-helidda shaqaynta ugu badan. Haddii rafcaankaagu uu buuxiyo shuruudaha rafcaan la dadajiyey, waxaad ku heli doontaa go'aan 72 saacadood gudahood ee helitaanka.

Cabashooyinka iyo Rafcaanada

Cabasho waa cabiraad qanaaco-la'aan aad ka qabto adeegyadaada caafimaadka habdhaqan ee aan soo hoos gelin hannaanka rafcaanka ama Dhegaysiga Cadaaladda ah ee Gobol.

Tan waxa kamid ah walaacyada aad ka qabto tayada daryeelkaaga, sida ay kuula dhaqmaan shaqaalaha iyo adeeg-bixiyeyaashu, iyo diidmooyinkaaga go'aanada la xidhiidha daryeelkaaga. Waxa aad xareyn kartaa cabasho wakhti kasta.

Rafcaan ayaa la gudbin karaa marka aadan ku raacsanayn go'aan ku saabsan adeegyada aad hadda hesho ama jeclaan lahayd inaad hesho.

Waa codsi dib-u-eegid **Ogaysiiska Go'aanka ka Dhanka ah Helitaanka Adeegyada (NOABD)**. NOABD waa waraaq rasmi ah oo ku saabsan tallaabo la xiriira adeegyadaada ama codsigaaga helitaanka adeegyada. Waxa waajib ah in rafcaanka lagu gudbiyo 60 maalmood laga bilaabo taariikhda NOABD.